**Xuquuqdayda ka Qaybqaataha WIC ahaan:**

- Shuruucda helitaanka WIC waa kuwo loo siman yahay ayada oo aan loo eegayn isirka, midabka, wadanka qofku kasoo jeedo, da'da naafanimada ama jinsiga.
- Ujeedada WIC waa inay i siisa macluumaad ku saabsan nafaqada, naas-nuujinta iyo cuntada caafimaadka leh iyo inay igu xirto adeeg ama bulsho caafimaad oo kale ee kasta ee aan u baahanahay. Waxaa la igu dhiirigaliyay inaan ka qaybqaato adeegyadaan.
- Xirfadleyaasha caafimaadka ee WIC waxay ila kaashan doonaan diyaarinta hadafyada nafaqada si loo xoojiyo hab nololeedka caafimaadka leh.
- Haddii aan u guurayo gobol kale, waxaan u sheegi doonaa WIC waxayna i siin doonaan waraqaha badelashada si aan u qaato oo adeegyadayda WIC ay iigu sii socdaan markaan halkaas tago.
- Waxaan codsan karaa Dhegaysi Caddaaladeed haddii shaqaalaha WIC uu ii sheego inaanan kusii jiri karin WIC anna aan ka diido. Waxaan haystaa 60 maalmood oo ka bilaabanaya marka ay isoo gaarto waraaqda ku saabsan u qalmitaankayga si aan waraaq ugu qoro ama u waco xaafiiska WIC ee deegaankayga codsina ugu dirsado.

**Xuquuqdayda ka Qaybqaataha WIC ahaan:**

- Ka qaybqaadashada wax ka badan hal Barnaamij oo ay WIC leedahay (gobolka dhexdiisa ama banaankiisa kajira) waa sharci darro waxaana ka dhalan doonta in barnaamijka la iga joojiyo.
- Waxaan ogolaan doonaa baaritaanka caafimaadka ay WIC ku samaynayso dhammaanba dadka codsaday ee qoyskayga kamidka ah. Baaritaanka caafimaadka WIC waxaa kamid ah ka jawaabista su'aalaha caafimaadka iyo nafaqada, cabiraadda dheerarka, miisaanka iyo baaritaanka dhiigga ee laga baarayo dhiig la'aanta. Arrintaan waxay WIC ka caawinaysaa in ay bixiso kaalmooyin ka jawaabaya baahiyaha qoyskayga.
- Waxaan u imaan doonaa ballamahayga ama waan soo wici doonaa haddii aanan imaan karin ballanta.
- Waxaan WIC ku wargalin doonaa isbadel kasta oo muhiim ah ee igu yimaada sda macluumaadkayga xiriirka, isbadalada magacyada iyo isbadalada mas'uuliyadda caruurta aan mas'uulk aka ahay ee hela adeegyada WIC.
- Waxaan xubnaha shaqaalaha, shaqaalaha bakhaarada, iyo dhismeyaasha WIC ula dhaqmi doonaa si ixtiraam iyo xushmad leh. Waxaan fahamsanahay in aniga, ama cid iga tirsan, aan lumin karno kaalmooyinkeena cuntada haddii aan af-lagaadayno, ku xadgudubno, hadadno ama jir ahaan u waxyeelayno xubin ka tirsan shaqaalaha WIC, macmiil kale oo ay WIC leedahay ama shaqaalaha bakhaarada.
- Waxaan soo iibsan doonaa kaliya cuntooyinka la ii ogolyahay ee ku qoran liiska cuntada kaalamda ah ee WIC aniga oo isticmaalaya kaarka elektorooniga ah ee eWIC ee la i siiyay.
- Waxaan cuntada WIC siin doonaa kaliya qofka(dadka) barnaamijka kujira. Waxaan fahamsanahay in cuntooyinkaan WIC la ii siiyay inay sare u qaadayaan ayna xoojinayaan badqabka nafaqada ee qofka iyo inay gacan ka gaystaan daboolista cadadka isticmaalka loo baahan yahay ee nafaqada ama cuntada muhiimka ah.
- Kama ganacsan doono, ma iibin doono, ma wareejin doono wax kalena kuma badelan doono, iskumana dayi doono ka ganacsiga, iibinta, wareejinta ama badalashada, cuntada/nafaqada ama kaalmada la i siiyay. Kama ganacsan doono, ma iibin doono, ma wareejin doono wax kalena kuma badelan doono, iskumana dayi doono ka ganacsiga, iibinta, wareejinta ama badalashada, cuntada/nafaqada ama kaalmada la i siiyay.
- Waxaan haysan doonaa muddo saddex bilood ah dhammaanba rasiidyada bakhaarada

Maarso

cuntada ama nafaqada ee aan ku soo iibsado lacagta aan tan WIC ahayn kuwaas oo lamidka ah kuwa ay WIC i siiso haddii aan rabo inaan iska iibiyo, ka ganacsado ama aan bixiyo waxyaabahaan. Waxaan sidaas u samaynayaa inaan cadeeyo inaan alaabtaan lagu soo gadin lacagta WIC.

**Ka qaybqaataha WIC ahaan waxaan fahamsanahay:**

- Inaan ku khasbanahay inaan dib codsi usoo gudbisado marka la gaaro muddada aqoonsiyada mar labaadna la i qiimaynayo inaan barnaamijka u qalmo iyo in kale.
- WIC ma bixiso dhammaanba cuntada ama nafaqda bishaas loo baahan yahay sababtoo ah WIC waa barnaamij kaabis ah.
- Haddii aanan haysan kaalmooyinka cuntada la i siiyay afar billood oo isku xigta, waxaa la iga saari doonaa barnaamijka.
- Waaxda Caafimaadka iyo Adeegga Bulshada (HHS) waxay ogolaan kartaa la wadaagista macluumaadkayga WIC barnaamijyo u gaar ah caafimaadka iyo waxbarashada. Barnaamijyadaanu waxay macluumaadkaan u adeegsan karaan go'aan ka gaarista u qalmitaanka barnaamijyadooda; inay i siiyaan macluumaad ku saabsan barnamijyadaas iyo inay nidaamka codsiga fududeeyaan; si ay u hagaajiyaan caafimaadkayga, waxbarashada iyo badqabka haddii aan horeyba isaga diiwaangaliyay barnaamijyadooda; iyo in ay xaqiijiyaan baahiyahayga daryeelka caafimaadka la daboolay. Macluumaadkaan waxaa isticmaali doona wakaaladaha WIC iyo ururada bulshada si ay ugu maamulaan barnaamijyadooda u adeega dadyowga u qalma Barnaamijka WIC. Waxaan fahamsanahay in HHS ay sidoo kale ogolaan karto la wadaagista cid kale macluumaadkayga WIC sida ay qabaan sharciyada gobolka ama federaalku. Waxaan codsan karaa liiska barnaamijyo HHS ah kuwaas oo lala wadaagi karo macluumaadkayga WIC sida kujirta Siyaasadda WIC "Qarsoonaanta Macluumaadka Ka qaybqaataha".

Waxaa la ii sheegay xaquuqahayga iyo waajibaadkayga kujira Barnaamijka. Waxaan xaqiijinayaa in macluumaadka aan ka bixiyay go'aaminta u qalmitaankaygu yahay mid sax ah, inta aan ka ogahay. Foomkaan caddeynta waxaa lagu dhameystiray ku xirnaanta helitaanka caawinta federaalka. Saraakiisha barnaamijku waxay xaqiijin karaan macluumaadka foomkaan kujira. Waxaan fahamsanahay in haddii si ulakac ah aan uga beensheego ama u marin habaabiyo warbixinta ama si ulakac ah uga been abuurto, u qariyo, ama aan qariyo xaqiiqada jirta ay ka dhalan karto inaan lacag siiyo wakaaladda Gobolka, taasoo ah lacag caddaan ah, qiimaha u dhigma kaalmada aan sida khaldan ku helay la i gayn karana dacwada madani ah ama faldanbiyeed ah si waafaqsan sharciga Gobolka iyo kan Federaalkaba.

Magaca ka Qaybqaataha(yaasha) maanta aqoonsiga la siiyay: ___________________________

Saxiixa ka qaybqaataha/waalidka/mas'uulka ______________ Taariikhda: _________________

Si waafaqsan sharciga madaniga ah ee federaalka iyo Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA) shuruucda iyo siyaasadaha xaquuqaha madaniga ah, hay'addaan waxaa ka mamnuuc ah inay sameyso takoor ku saleysan asal, midab, wadanka qofku kasoo jeedo, jinsiga (oo ay kujiraan aqoonsiga iyo rabitaanka galmada), naafanimada, da'da, ama cadgoosashada ama ka aarsashada gowlihii ka horeeyay xaquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu diyaarin karaa luuqad aan Ingiriis ahayn. Dadka

naafada ah ee u baahan qaab kale oo loola hadlo si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (sida, aaladda indhooleyaashu wax ku bartaan, farta waaweyn, maqaal, Luuqadda Dhagooleyaasha Maraykanka), waa inay la xiriiraan gobolka mas'uulka ka ah ama wakaaladda deegaankooda ee maamulaysa barnaamijka ama Xarumaha YOOLKA ee USDA (202) 720-2600 (codka iyo TTY) ama USDA kala xiriir Adeegga Isku dhiibka ee Federaalka (Federal Relay service) (800) 877-8339).

Si uu usoo gudbiyo dacwad ku saabsan haybsooc, qofka dacwoonaya waa inuu buuxiyaa foomka AD-3027 Foomka Canashada Haybsooca Barnaamijka USDA kaasoo laga heli karo:https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf , xaafiis kasta oo ay USDA leedahay, ayadoo la wacaayo (866)632-9992 ama la qoraayo waraaq ku socota USDA. Waraaqdu waa inay ka koobnaataa magaca qofka cabashada sameynaya, ciwaanka, lambarka teleefoonka, iyo faahfaahin qoran oo ku saabsan fal eedaha ee haysooca ah kaasoo wata tafaasiil ku filan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha Xaquuqaha madaniga ah (ASCR) ee ku saabsan qaabka iyo taariikhda eedda xadgudubka ka dhanka ah xaquuqaha madaniga ah. Foomka AD-3027 ama waraaqda dhammayska tiran waa in USDA loo gudbiyaa ayada oo la adeegsanayo:

(1) Boosto: U.S. Department of Agriculture Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue SW, Washington, DC 20250-9410; ama
(2) Fakiska: (833)256-1665 ama (202)690-7442; ama
(3) iimayl:program.intake@usda.gov

Hay'addaanu waxay bixisaa fursad loo dhan yahay.